

Ogow xuquuqdaada: Nabadgelyo dareen marka boliiska ay ku joojiyaan iyo saraakiisha fulinaya COVID-19

Dawladd goboleedka waxay awood siisay boliiska, saraakiisha sharciga iyo kuwa khaaska ah si ay u fuliyaan amarka guri joogga waqtigan.

Talada #1

Inta aadan guriga ka bixin, haddii lagu weydiiyo, ka fakar sababta aadan guriga u joogin. Tani waxaa ka mid ah jimicsi, cunto iibsasho, ama in aad shaqo ama takhtar u socoto. Fikradda 1aad waa in aad shirkadda shaqadaada weydiisato warqad caddeyneysa in aad hadda u socoto shaqo. Haddii shirkadda aysan ku siinin warqadda, nala soo xiriir si aan talo kuu siinno.

Talada #2

Haddii lagu joojiyo, saraakiisha waxay ku weydiin karaan su'aalo. Waxay ku weydiin karaan aqoonsi. Waxay ku weydiin karaan magacaaga, cinwaankaada iyo taariikhda dhalashada. Waxay ku weydiin karaan meesha aad u socoto ama in aad ka qayb galeyso xafad dadweyne. Hadal ahaan ayaad u jawaabi karaa. Ma u baahnid in aad tusto aqoonsi ama waradda shaqada. Laakiin si aad kalsooni u dareento, aqoonsigaaga soo qaado.

Haddii aad diiddo aqoonsiga ama in aad ka jawaabto su'aalaha sarkaalka, waxaad mudan kartaa \$750 oo ganaax ah. Haddii sarkaalka uu xaqiijiyo in aad ku xad gudubtay amarka jogitaanka guriga ama aad ka diiddo in aad ka tagto xafad ay isugu yimaadeen dadweyne, waxad mudan kartaa \$750 ganaax ah.

Talada #3

Waxaad sarkaalka weydiin kartaa sharciga uu aaminsan yahay in aad jabisay. Haddii aan lagugu edeynin in aad jabisay wax sharci ah, waxaad weydiin kartaa "Ma la i xabbisayaa mise waan iska tegi karaa?" Haddii aan lagu xabbiseynin, waad iska bixi kartaa. Marnaba ha isku cararin ilaa inta ay su'aalaha ka dhammaadaan. Khatar ayay noqon kartaa ama waxay sababi kartaa in lagu siiyo tikit.

Talada #4

Fadlan la soo xiriir Ururka Difaaca Shaqaalaha (WAC) haddii lagu joojiyay ama tikit lagu siiyay. Waxaan gacan kaa siineynaa dhanka sharciga. Amarka adag ee joogitaanka guriga, marnaba ma cawinayo shaqaalaha muhiimka ah ee aan guriga joogi karin. Axaan aaminsan nahay sharci shaqaale ee caddaalad ah, sida bixinta mushaarka maalmaha xanuunka oo ah tallaabo lagu cirib tiri karo cudutka COVID-19.

Sababahee baan guriga uga tegi karaa waqtigan amarka guri joogga ah?

Khamiis Aprili 8da ilaa iyo Maajo 20ka, 2021, dawladda Ontario waxay sheegeysaa in guriga aad uga bixi karto 29 sababood oo muhiim ah, waxaana ka mid ah:

- In aad shaqada aaddo (kol haddii aadan gurig ku shaqeyn karin)
- In aad u socoto dugsiga ama daryeelka carruurta
- In aad u baxayso sababo caafimaad sida daaweyn, jimicsi iyo dagaalka qoyska
- In aad soo iibsaneyso cunto waxyaabaha daryeelka shakhsi ah
- Ka qayb galka xaflado gaar ah sharciga ayaa kuu saamaxaya sida aroosyada, duugta ama adeegyada Diiniga ah.

Si aan kala sooc lahayn sarkaalka ma ii joojin kara? Maxay yihiin sababaha?

Saraakiisha jidka kuguma joojin karaan si aan kala sooc lahayn. Laba sababood oo kaliya ayay kuu joojin karaan

1. Haddii ay jiraan sababo macquul ah oo aad ugu xadgudubtay amarka guri joogga
2. Haddii uu jiro shaki la taaban karo oo aad uga qayb galeyso isu imaatinka barxadaha

Muxuu sarkaalku I weydiin karaa?

- Waxaa lagu weydiin karaa magacaaga, cinwaankaada iyo taariikhda dhalashada
- Waxaa lagu weydiin karaa maxaad gurig uga soo baxday ama in aad ka qayb galeyso isu imaatinka barxadaha.

Maxaa dhacaya hadii aan jebiyo amarka guri joogga?

- Jebinta amarka guri joogga, waxaad ku muteysan kartaa \$750 oo ganaax ah.
- Waxaad muteysan kartaa \$750 ganaax ah haddii aad diiddo aqoonsiga ama aad ka tagi weydo isu imaatinka barxadaha.
- Waxaad muteysan kartaa \$1,000 oo ganaax ah haddii aad cid kale u joojiso ku xad gudubka amarka ama aad is hortaag u muujiso sarkaalka.

Maxaan sameeya hadii aan tuhmo in sarkaalka uu I xabbisayo?

- Inta aadan ka bixin guriga, ka fakar in aad su'aalaha uga jawaabto sababo macquul ah.
- Uma baahnid in sarkaalka aad isku caddeyso. Laakiin kalsooni darta, hayso caddeyn sida kaarka aqoonsiga ama warqadda shaqada.
- Waxaad xaq u leedahay in aad weydiiso sharciga ay tuhmayaan in aad ku xad gudubtay. Haddii aan lagugu eedeynin wax xad gudub ah, waxaad weydiin kartaa "Ma la i xabbisay mise waan tegi karaa?" Haddii aan lagu xabbisin, waad iska tegi kartaa. Ha iska cararin ilaa iyo inta ay su'aaluhu ka idlaadaan. Waxay kuu horseedi kartaa eedeymo dheeri ah.
- Fadlan la soo xiriir Ururka Difaaca Shaqaalaha (WAC) haddii lagu joojiyey ama tikit lagu siiyay. Waxaan gacan kaa siineynaa dhanka sharciga.